



Urur
Siyaasadeedka
Kaah Puntland

Habraaca
Ururka Kaah





**Kaah Political
Association
Puntland State
of Somalia**

Mar, 2020
Garowe.

Designed by
Dookh Press,
Info@dookhpress.com
www.dookhpress.com



Tusmada Habraaca

Xiriirka Ururka Ee Gobollada	4
SOOYAALKA URURKA KAAH	6
Hiigsiga Ururka:	7
Himilada Ururka:	7
Farriinta Ururka	8
Fikirka Ururka [Political Ideology].	9
Xubnimmada Ururka [Membership]	11
Ajandeyaasha Siyaasadda Ururka	11
Xiriirka Dadweynaha	12
Isbahaysiga Ururka	12
Horumarinta & Tabobarrada Xubnaha	13
Qaab-dhismeedka Ururka	14
Baaqa Ururka	17
Lifaaqyo	18

Xiriirka Ururka Ee Gobollada

Urur siyaasadeedka Kaah, xaruntiisa guud waa magaalo madaxda Dowladda Puntland ee Garowe. Ururku, waxa uu xarumo ku leeyahay 9'ka gobol ee Puntland iyada oo gobol walba leeyahay xiriirkiisa gaarka ah. Halkan hoose, waxaa ku taxan xiriirka gobollada ee ururka.

Gobolka Nugaal, HQ.

Jidka wasaaradaha, Martisoor Hotel, Garowe Puntland Muslim Xaaji Ceydaruus
+252907310593

www.kaah.so
info@kaah.so

Gobolka Mudug, Xarun.

Xarunta Gaalkacyo
Israac, Laanta saddexaad
Maxamuud C/nuur Aadan
+2520907795967

www.kaah.so

info@kaash.so

Gobolka Bari, Xarun

Laanta Hawada,
Jidka Ayroboorka Maqaska
Abdirahman M. Mohamoud
+2520907799323

www.kaah.so
info@kaash.so

Gobolka Karkaar, Xarun

Xarunta Qardho, Xorgoble
Axmed Cali Muuse
+2520907627988

www.kaah.so
info@kaash.so

Gobolka Sanaag, Xarun

Xaafadda Horseed,
Aagga Bangiga.
Xarunta Badhan, Sanaag
Seynab Abdi Aar
+2520907764465

www.kaah.so
info@kaash.so

Gobolka Haylaan, Xarun

Xarunta Dhahar,
Horseed, Masjid Jaamaca
Ayub Cige Maxamed
+2520907726628

www.kaah.so
info@kaash.so

Gobolka Cayn, Xarun

Xarunta Buuhoodle,
Waaberi, Xaaji Hiirad
C/risaaq Maxamed Sahal
+2520907794813

www.kaah.so
info@kaash.so

Gobolka Sool, Xarun

Xarunta Degmada Boocame,
Xaafadda Hillaac, MCH-ka.
Siciid C. Ashkir Geesood
+2520907713028

www.kaah.so
info@kaash.so

Gobolka

Gardafuu, Xarun

Xarunta Degmda Caluula,
Faras Magaalaha, Caluula
C/raxmaan Xooloside
+2520907799223

www.kaah.so
info@kaash.so



SOOYAALKA URURKA KAAH

Urur siyaasadeedka Kaah, urur siyaasadeedkii u horreeyey ee looga dhawaaqo deegaannada Puntland, ka dib furista hannaanka xisbiyada badan ee Puntland, taas oo saldhig u ahayd ka go'naanta hoggaanka ururka si Puntland loo gaarsiyo hannaanka xisbiyada badan, muwaaddin walba u meelmariyo codkiisa.

Urur siyaasadeedka Kaah, waxa uu u taagan yahay maammul wanaag oo ah tayeynta garabyada iyo qeybaha kala duwan ee Dowladda, hirgelinta dawladdnimo hana-qaad ah oo gaarsiisan filashada dadweynaha reer Puntland si ay u gaaraan halka ay tiigsanayaan, iyo ilaalinta midnimada ummadda Soomaaliyeed meel walba oo ay joogaan, goob walba iyo goor walba. Urur siyaasadeedka Kaah, waxaa aasaasay golayaasha dawladda, aqoonyahannada, siyaasiyiin ruugcaddaa ah iyo shaqsiyaad saamayn ku leh bulshada dhexdeeda qeyb lixaad leh ka yihiin dhallinyarada iyo haweenka dadweynaha hormuudka u ah, Ururka Kaah oo la yagleelay Feb, 2020 waxaa loo aasaasay ka shaqaynta horumarka siyaasadeed iyo dhaqan-dhaqaale ee Dawladda Puntland. Hal-ku-dhegga Ururku waa: HOGAAN IYO HIMILO, oo macnaheedu yahay hoggaan toosan ayaa lagu gaari karaa himilooyinka iyo hiigsiga bulshada.

Urur Siyaasadeedka Kaah, waxa uu ka shaqaynayaa – samaynta aragtiyaha bulshada iyo hagistooda. Soo saarista siyaasiyiin reer Puntland oo dabooli kara baa-hiyaha Soomaalida, Ka shaqaynta isdhexgalka Bulshada reer Puntland, u horseeddida Soomaailda hannaan

doorasho dimuqraaddi ah guud oo muwaaddin walba leeyahay helayo codkiis meel u maray, Barista iyo horseed u noqoshada hannaanka dimuqraadiyadaynta Puntland. Qaabeynta mustaqbalka Dowladda Puntland lagana dhigo mid dabooshay baahiyihii loo yagleelay.

Ururka Kaah, waa urur u furan kulansiinta mufakiiriinta, siyaasiyiinta iyo daneeyeyaasha horumarinta bulshada iyo siyaasadda. Waxa uu gacammo furan ku soo dhawaynayaa cid walba oo ku soo biiraysa ururka Kaah, iyada oo la tixgelinayo rabitaanka bulshada reer Puntland.

Sharciyadda jiritaanka ururka Kaah, waxaa ayidaya dastuurka Dowladda Puntland qodobkiisa 41aad ee xuquuqda muwaadinka, Qodobka 46'aad oo tibaaxaya in Puntland lagu dhaqayo nidaamka xisbiyada badan, iyo ururka Kaah oo buuxiyey shuruudaha furashada xisbiyada ee ay tibaaxayaan dastuurka Dowladda Puntland kan xeerka furashada xisbiyada Dowladda Puntland ee uu dejiyey guddiga doorashooyinka Dowladda Puntland.

Hiigsiga Ururka:

Hiigsiga ururka Kaah, waa u hawlgalidda sidii loo gaari lahaa bulsho midaysan, wadajirta, kana fayow qabyaalad, taa soo dhaqangelinaysa nidaam dawladeed ku dhisan wadatashi iyo dimoqraadiyad, oo kor u qaadaya heerka nololeed ee muwaadiniinta reer Puntland.

Himilada Ururka:

Himilada Ururka KAAH waa taabbogelinta xukuumad ku dhisan: Talo wadaag, rabitaanka shacabka, sarraynta iyo ku dhaqanka sharciga, bulshaduna ay ka qaadnayso kaalinta uga aaddan, islamarkaasna baahisa awoodda maammul ee Dawladda iyadoo la raacayo hannaanka maamul-baahinta.

Urur siyaadeedka Kaah, waa urur u taagan hirgelinta himilada shacabka Puntland ay ku taamayaan, hiigsashada hiraallada shacabka ku hanweyn yihiin si uga shaqeeyaan aayahooda dambe, noqdaanna kuwa boos sare uga jira bulsho weynta Soomaaliyeed.

Fariinta Ururka

Fariinta Ururku waxay ka tarjumaysaa falsafada Ururka iyo barnaamijkiisa siyaasiyaga ah, waa-na qoraal kooban oo xaalad walba oo uu ururku marayo la adeegsanayo, maxay haddaba noqon kartaa fariinta ururku: **“Fursado shaqo iyo fuf dhaqaale”**, taasoo macneheedu yahay inuu Ururku xoogga saarayo abuuridda fursado shaqo iyo koboc dhaqaale si kor loogu qaado nololshada bulshada gaar ahaan dhallinyarada oo ay shaqo la’aani haysato.

Fikirka Ururka [Political Ideology].

Urur siyaasadeedka Kaah, waxa saldhig u ah ilaalinta diinta iyo dhaqan bulshada reer Puntland, sooyaalka bulsho, midnimada iyo wadajirka shacabka. Waa astaanta kor u qaadista hannaanka dowladnimada iyo wada-noolaanshaha bulsho. Waxaa ururka saldhig u ah abuuridda iyo barbaarinta bulsho dimoqraaddi ah oo shacabku awoodda leeyahay, kuna dhaqanta nidaam siyaasi ah oo xooggan, hufan, lehna isla-xisaabtamo qaangaara.

Hirgelinta bulsho aamminsana shaqo tayo leh, waxsoo-saar, xirfado, isku-tashi, kala-dambaynta, ku dhaqanka sharciga iyo xoojinta dareenka masuuliyadeed ee ummadda.

Xoojinta sinnaanshaha bulshada (social equality), iyo “Caddaalad Bulsho – Social Justice”: iyada oo kor loo qaadayo nolosha dabaqada hoose iyo tan dhexe ee bulshada, laguna taageerayo kab dhaqaale oo loo fidiyo ganacsatada dabaqada dhexe, taageero dhaqaale oo danyarta la siinayo iyo shaqo abuuris lagu dhiirigelinayo dhallinyarada, waana waxa lagu magacaabo “welfare state”. Islamarkaasna la dhisayo nidaam caddaalad ah oo ogolaanaya in la wadaago awoodaha iyo khayraadka dalka.

Falsafadda [Fikirka aasaaska] Urur siyaasadeedka Kaah, waxa uu ku fadhiyaa kordhinta tacab-dhalka gudaha [Local Production] iyo soo-saarista kheyraadka [Nation wealth/reseource] dalka sida; beeraha, kalluunka, shaqaale dalka ku filan, macdanta iyo shidaalka dalkeenna ceegaaga.

HIMILO

Ururka Kaah, waxa uu himiloonaayaa ka miro dhalintaa;



1

U-hawlgalidda sidii loo heli lahaa bulsho midaysan, wada-jirta, kana fayow qabyaaladda iyo dhammaan dhaqamimada gurraacan.

I

Dhaqangelinta nidaam daw-ladeed oo ku dhisan wa-datashi, dimoqraadiyad (wafaqsaan shareecada Islaamka), simmaan iyo caddaa-lad bulsho, una horseedi kara dadkiisa nabad iyo xasilooni waarta iyo horumar dhinac walba ah.

II

Kor-u-qaadidda heerka nololeed ee dhammaan muwaadiniinta reer Puntland.

III



URURKA
POLITICAL
ASSOCIATION

@UrurkaKaah
@KaahAssociation
info@kaah.so

Himilada Xisbiga KAAH ayaa ah dhismatha xukuumad ku dhisan. Talo wadaag, rabitaan shacabka, saraynta iyo ku dhaqanka sharciga, yoojinta dhaqanka madantiga ee ku dhisan dimoqraadiyadda, caddaa-lad bulsho, daahurtamaan, iyo isla-xisaabtan; islamarkaana baahisa awoodda maamul ee Dawladda iyadoo la raacayo hannaanka maamul-baahinta.



2

HIIGSI

Ururka Kaah, waxa uu

Xubnimmada Ururka [Membership]

Ururka Kaah, waa urur dadweyne, waxa loo yagleelay in bulshadu ku fahanto nidaamka xisbiyada badan, taasi waxa ay gogol xaadh u tahay bulshadu in ay ku soo biiri karaan, iyaga ka heli doona fursado badan oo ay ka mid yihiin; Hirgelinta hiigsiga qofeed, dhisid qofeed, haggis qofeed, tabobarro iyo soo-saarista siyaasiyiin hor leh.

Xubinnimada Ururku waa Shaqsi, umana gudbi karto cid kale, lamana dhaxli karo, waxayna u furantahay qof kasta oo buuxiya shuruudaha xubinnimada ee ku xusan qodobka 10aad ee Dastuurkan. Si aad u ogaatid, shuruudaha xubinnimada iyo hannaanka aqbalaadda ku biiridda xubinnada fadlan booqo, xafiiska kuugu dhow ee ururka Kaah hadba gobolka aad joogtid.

Cid walba oo xubin ka noqota ururka Kaah waxa ay xaq u leedhaay, guntanka xirmooyin waajibaad iyo he-lidda xuquuq qofeed. Xuquuqda xubinnimadu, waxa u bilaammaysa marka uu buuxiyo shuruudaha xubbinni-mo laga na helo waajibaadka uu ururku ku yeeshay.

Ajandeyaasha Siyaasadda Ururka

Urur siyaasadeedka Kaah, oo ay ku kulmeen rugcadd-aayo siyaasadeed waxa uu ururrada kale uga duwan yahay in uu haysto awood shacab, mid maskaxeed iyo mid aqooneed si loo hirgeliyo nidaanka dimuqraaddiyadda Dowladda Puntand.

Xubnaha ururka Kaah, waxa ay si joogto ah ugu kulmaan heerarka kala duwan ee ururka sida; hoggaanka sare, fulinta, golaha dhexe, heer gobol, heer degmo iyo

mid tuulo inta ba, iyaga oo ka xaajoonaya xaaladda horumarineed ee ururka. Waxa aan bulshada si joogto ah ula wadaagnaa – heerka horumarineed ee ururka, dalka iyo deegaannada kala duwan ee Puntland. Wacyigelin ku saabsan horumarinta ayaa loo gudbiyaa dadweynaha taas oo keentay in ururka ay ku soo biiraan xubno kala duwan oo jooga gobollo kala fog.

Ururka Kaah waxa uu doorasho walba diyaarinayaa buugga doorashada ururka, si uu bulshada ugu qeexo aragtida ururka uga na dhaadhiciyo ballanqaadyada ururka. Barnaamijkaan doorashada waa isu geynta hiigsiyada kala duwan ee tartameyaasha goleyaasha kala duwan ee boosaska bannaan u ordaya.


Xiriirka Dadweynaha

Ururka Kaah, waa urur qaabdhismeedkiisu u samaysan yahay hannaanka ilaalinta jaranjarada xiriirka dadweynaha ilaa hoggaanka guud ee ururka. Waxaa jira guddiga Xiriirka Gobollad iyo Goleyaasha oo si gaar ah ururka ugu qaabbilsan wargeynta ururka iyo faafinnada si bulshada looga haqabtiro xiriirka ururka ee heer walba. Tuulo, degmo, gobol, fulin iyo hoggaanka sare waa heerka xiriirka ururka.

Sida oo kale, iyada oo laga faa'iidayo xaalada casriga ah ee la marayo ururku waxa uu leeyahay mareeg rasmi ah, shabakadaha baraha bulshada iyo mareegaha ururka. Guddiga warbaahinta iyo wacyigelinta ururka ayaa si maalinle ah ugu soo qaata xaaladaha taagan ee ururka. Sidoo kale waxaa jira lambarka gaaban ee ururka oo aad qof walba ka heli karo xiriirka urur kaas oo ah 344.

Lambarka Gaaban

Taageerayaasha ururka iyo cid walba oo doonaysa in ay xog dheeraad ah ka hesho, Urur Siyaasadeedka Kaah, waxa aan ku dhiirrinaynaa in ay wacaan lambarkaan gaaban. Waxa aan si fudud uga heli kartaa xog dhammaystiran oo ku saabsan ururka, gaar ahaan himilooyinka, ujeedooyinka iyo xiriirrada gobollada ee Ururka.



Gobol walba, goor walba, gelin walba, xog dhammaystiran ka hel lambarkaan.

Isbahaysiga Ururka

Ururka Siyaasadeedka Kaah, waxa uu u furan yahay soo dhawaynta iyo gacan qabashada bulshada reer Puntland, ha ahaadaan siyaasiyiin, shakhsiyaad, ururro, isbahaysiyo iyo kooxo u abaabulan qaab midow ah oo aan ka hor imaanayn wadajirka bulsh iyo dastuurka Dowladda Puntland u yaal. Urur siyaasadeedka Kaah, waxa uu soo dhawaynayaa cid walba oo ku soo biiraysa, lana samaysanaysa isbahaysi si loogaaro yoolasho loo unkay ururka. Cid walba oo aan ka hor imaanayn dastuurka dalka, mabaadii'da & xeerarka ururka iyo dhammaan xeerarka kale ee dalka u yaalla.

Urur Siyaasadeedka Kaah, waxa uu si milgo iyo maamuus leh u soo dhawaynayaa ururrada bulshad rayidka ah, kooxaha ololeyaasha bulshada ka shaqeeya sida; isxilqaameyaasha, dirsaneyaasha iyo ururrada dhallinyarada, ururrada haweenka iyo jaaliyadaha si la isugu dubbarido qeybaha kala duwan ee bulshada. Sida oo kale, waxa aan gaar u bogaadinaynaa ku soo biirista ururrada kale ee siyaasadda kuwaas oo ka dhisan deegaannada Puntland.

Horumarinta & Tabobarrada Xubnaha

Si loo gunto masuuliyadda uu ururku u qaaday ummadda reer Puntland, ururku waxa uu xaqiijinayaa hirgelinta nidaam aqooneed, tabobareed iyo cilmibaariseed, si loogaaro yoolasha laga mideysan yahay. Ururku, waxa uu leeyahay waax u qaabbilsan – Waxbarashada, Tabobarrada iyo Cilmibaarista si loo saaro hoggaamiyeyaal ku qalabaysan aqoon, aragti iyo si loo tayeeyo awoodda ururka, loo na tigsado himilooyinka shacabka iyo kan ururka oo iskaabaya.

Ururku, waxa uu hirgelinayaa hay'adda cilmibaarista ururka, oo u shaqayn doonta sidii barnaamijka siyaasadda ururka loogu beddeli lahaa kuwo horumarineed. Hay'addan ayaa waxa ay furka koowaad awoodda saaraysaa, sidii 6'da tiir ee barnaamij siyaasadeedka Ururka ugu beddeli lahayd hab ay bulshad reer Puntland ka wada faa'iidaysan karaan una dhigan qaab cilmibaariseed, sida oo kale hay'addu waxa ay ka shaqayn doontaa cilmiyeynta xogaha kala duwan ee ururku ku hawlgelayo.

Qaab-dhismeedka Ururka

Qaabdhismeedka urur siyaasadeedka Kaah, ayaa ka dhigaya urur gooni ka ah ururrada kale, maaddaama qaabdhismeedkiisu u qaabaysan yahay hannaan xog isgaarsiin oo u sahlan bulshada reer Puntland, habkaas oo ah; Heer tuulo, heer degmo, heer gobol, gole dhexe, gole fulin iyo hoggaanka ururka oo ah ubucda ugu sarraysa.

[1]. Shirweynaha Ururka (Golaha Guud)

[2]. Golaha Dhexe ee Ururka

[3]. Guddiga Fulinta ee Ururka

[4]. Guddiga Gobollada ee Ururka

[5]. Guddiga Degmooyinka ee Ururka

[6]. Garabyada kala duwan ee Ururka;

* Sida: garabka haweenka, dhallinyarada, xirfadlayaasha, jaaliyadaha dibadda, Jaamacadaha, Aqoonyahannada, dhaqanka iyo suugaanleyda.



Golaha
Guud

01

02

Golaha
Dhexe

Golaha
Fulinta

03

04

Guddiga
Gobollada

Guddiga
Degmooyinka

05


06

Garabyada
Ururka

Jaantuuska 01:
Habdhismeedka Go-
leyaasha Urur Siyaasa-
deedka Kaah.

Haweenka
Dhallinyarada
Culimada
Aqoonyahanka
Jaamacadaha
Dhaqanka

Jaantuustka 02: Habdhismeedka Golaha Fulinta Ee Urur Siyasadeedka Kaah.



Baaqa Ururka

Dadweynaha Dowladda Puntland,

Ururka Kaah, oo ururka ugu weyn uguna ballaaran deegaannada Puntland, waxa baaq soo jeedineed u dirayaa cid walab oo xiisaynaysa arrimaha siyaasadda, horumarinta bulshada, u shaqaynta dadweynaha, dhisidda dowladnimo tayo leh, tiigsiga aayaha dambe, ciribsigu sooyaalkeennii tegay, abuuridda ilo dhaqaale oo dalkeenna wax u soo kordhiya, soo saarista kheyraadka dihin ee dalkeenna, cilmibaarista iyo kobcinta aqoonta, kobcinta dhaqaalaha dalka, kor u qaadista tacabdhalka gudaha, dhismaha dowladnimo Soomaaliyeed oo xoog leh shacabka Soomaalidu na u siman yahay oo aan dib dambe loogu dulmin.

Shacabkeenow, haddii aad tahay daneeyaha danta guud, u soo jeedaha danaha aqoolan ee dalka lagu wado, ma tahay qof jecel arrimaha aan kor ku soo xusnay? Warcelintaadu haddii ay HAA! Tahay, kaalay noo imow, nagu soo biir, waddankaan waxa aan ku hagi doonnaa awoodda shacabkeenna, meel walba oo aan joogno waxa aan qaddarin iyo talo qaadasho u haynaa shacabkeenna, har iyo habeen taageeradooda maan, maaliyadeed iyo middooda muruq ba nala garab taagan. Waxa aan si gaar ah kuugu yeeraynaa in aadan maanta ka harin horusocodka uu u hishay urur weynaha Kaah, waxa ku leennahay mar kale KAALAY! Nagu soo biir!

*Xoghayaha Guud ee
Urur Siyaasadeedka Kaah,
H.E Ilyas Cisman Lugatoor
Wasiirka Duulista Hawada
Dowladda Puntland, Garowe*

Lifaaqyo

Lifaaq 01: Xiriirrada Gobollada



URUR SIYAASADEEDKA KAAH

منظمة كاه السياسية
KAAH POLITICAL ASSOCIATION



HEAD QUARTER OFFICE HQ

XAFIISKA XARUNTA DHEXE HQ

Tix : X/DH/U/K/0006/2021

Date: 31/March/2021

KAAH Contact:

Lr.	Gobolada iyo HQ	Xaafada	Magaca Maamulaha Xafiiska	Telefoon
	Xarunta Dhexe (HQ)	Aaga Wasaaradaha	Mohamed Abdullahi Mohamed (Sayga)	7952528/84 9091/84909 0
1	Sanaag	Horseed- Bank agtiisa	Saynab Cabdi Aar	907764465
2	Kar-kaar	Xorgoble -	Axmed Muuse Cali	907627988
3	Haylaan	Horseed-Masjid Jaamaca	Ayuub Cige Maxamed	907726628
4	Cayn	Waaberi- Xaaji Hiirad	C/risaaq Maxamed Sahal	0907794813
5	Mudug	Israac-Laanta 3aad	Maxamuud C/nuur Aadan	907795967
6	Bari	L/Hawada-Maqaska	C/raxman Max'ed Max'ud	907799323
7	Sool	Hillaac – MCH ka agtiisa	C/xakiim Axmed Cabdi	907602741
8	Gardafuu	centerka	C/rixmaan Xoolaside	0907799323
9	Nugaal	Xarunta Dhexe ku dhexyaal	Muslin Aidurus Haji	0907310593

Maamulaha Xarunta Dhexe

Mohamed Abdullahi Mohamed (Sayga)



Email: info@kaahparty.com / Email: kaahhq1224@gmail.com Tell: -849090/849091/7952525

Lifaaq 02: Aqoonsiga Ururnimo



AQOONSI URURNIMO

15.08.2020

*Guddiga KMG ah ee Doorashooyinka Puntland
maxa uu aqoonsiga ururnimo guddoonsiinayaa:*

Urur
SIYAASADEEDKA
KAAH



*Aqoonsigaani maxa uu jirayaa illaa inta ay ka qab-
soomayso doorashada golayaasha deegaanka Puntland.*



Us Same

Guuleed Saalax Barre

Guddoomiyaha Guddiga KMG ah ee Doorashooyinka Puntland

Lifaaq 02: Xafiiska Ururka



Booqashadii guddoomiyaha guud ee Ururka Kaah, H.E Siciid Cabdullaahi Deni, iyo furitaanka xarunta guud ee Ururka.



Guddoomiyaha guud ee Ururka H.E Siciid Cabdullaahi Deni iyo guddiga xilgaarsiinta Ururka.

Lifaaqa 03: Sawirro Guud.





Lifaaqyadani, waxa ay u badan yihiin arrimaha ururka sida booqashooyin, xafiisyada ururka iyo qeybaha kala duwan ee madaxyada urur Siyaasadeedka Kaah.



**KAAH
POLITICAL
ASSOCIATION**

www.kaah.so

  @Kaah



**Habraaca
Urur Siyaasadeedka
Kaah Puntland.**

**Kaah
Political
Association
Profile, 2021**